



GOORMAA AYAA LA ADEEGSADAA XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA?

Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada waxaa lagu dhaqmaa saddex xaaladood:

- colaadaha hubaysan ee caalamiga ah oo ugu yaraan laba dal u dhaxeeyo;
- xaaladaha gabi ahaan ama qayb ahaanba dhulka dal uu leeyahay qabsato awood shisheeye;
- colaadaha hubaysan oo ka dhacda dal gudahiisa oo u dhaxeya dawladda iyo mid ama in ka badan oo ah kooxo hubaysan oo abaabulan ama kooxo kala duwan hubaysan oo abaabulan.

Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada ayaa khuseeya dhammaan qaybaha ku lugta leh colaada, iyada oo aan loo eegeyn cidda bilowday

XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA YUU DHOWRAYA?

Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada wuxuu dhowraya dagaallamayaasha iyo kuwa aan dagaallameynin, ama aan ka qayb qaadi doonin colaadaha, sida:

- rayidka;
- shaqaalaha caafimaadka iyo Cilimada diinta;
- dadka dhaawacmay, dagaalyahannada buka iyo dadka badda ku hafta;
- maxaabiista dagaalka;
- rayidka xoriyadda laga qaaday.

Iyada oo la qirayo baahiyahooda gaarka ah, Xeerka Caalamiga ee Aadamnimada wuxuu siinaya caruurta iyo haweenka dhowritaan dheeraad ah.

Inta badan anaga oo la shaqeyneyno la hawlgalayaasheena Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ayaa waxaan caawinnaa dadka ku nool adduunka oo ay saameysay colaadaha hubaysan iyo qalalaasaha kale, anaga oo sameyneyno wax kasta oo aan awoodno si aan u dhowrno sharaftooda una yareyno dhibaataadooda.

Ayada oo la dhiirigelinaayo lana xoojinaayo xeerka aadamnimada loona doodayo mabaadii' da caalamiga ee bani'aadamnimada ayaa waxaan sidoo kale dooneynaa in aan ka hortagno darxumada.

ICRC waxay ku sugan tahay in ka badan 90 dal.

Xafiisyadeenda ayaa si joogto ah u guurguraan si ay ula jaan qaadaan isbeddellada ay sababaan colaadaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase.

Xarunta dhexe ee ICRC waxay ku taala Jeneva, Switzerland

- facebook.com/ICRCAfrica
- twitter.com/ICRC_Africa
- instagram.com/icrc_afrique
- blogs.icrc.org/Somalia

Ergada ICRC Soomaaliya
Wadada Denis Pritt
S.B 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nayroobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Beledweyne, Guricel iyo Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Febraayo 2020



IHL

AASAASKA XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA

ICRC

ICRC



T. Pizer/ICRC



Amisa Hussein/ICRC



Pedram Yazdi/ICRC



SPCS

WAA MAXAY XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA?

- Xeerka caalamiga ee aadamnimadu waa xeerar dhowr ah ujededdooduna ay tahay in la xaddido waxyeellada dagaalada hubaysan.
- Waxay xayiraadyo ku saabsan aaladaha iyo qaabaka dagaalka loo adeegsado ku soo rogtaa dhinacyada colaadda ka dhaxeeyso.
- Wuxuu dhowraya dadkaa aan dagaallameynin, ama aan ka qayb qaadan doonin colaadaha.
- Waxaa kale oo loo yaqaana xeerka dagaalka ama xeerka isku-dhacyada hubaysan

MUXUU XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA MUHIIM U YAHAY?

Xeerka Caalamiga ee Aadamnimadu waa mid ka mid ah aaladaha ugu awoodda badan ee beesha caalamku ay haysato si loo hubiyo badbaadada iyo sharafta dadka ee waqtiyada dagaalka. Xeerku wuxuu doon doonaya in uu si taxadar leh u ilaaliyo bani'aadamnimada xilli lagu dhex jiro colaado, oo mabda'a hagayana dhigaayo in xitaa dagaalku uu xad leeyahay.

“Axdiyada Jenefa (...) waxay sii wadayaan in ay sida ugu xoogga badan noo xusuusiyaan waajibaadka naga wada saaran oo ah in aan is daryeelno midba midka kale.”

— Nelson Mandela

SIDEE AYUU XEERKA CAALAMIGA EE AADAMNIMADA WAX U DHOWRAA?

IHL wuxuu maamulaa hab-dhaqanka colaadaha ee qaybaha colaadu ka dhaxeeyso wuxuuna dhowraya shakhsiyaadka ku jira gacmaha cadowga. Wuxuu kaloo:

- in ay ka fogaadaan weerarrada rayidka;
- reebaya ama xaddidaya hubka khaas ahaan kuwa naxriista daran ama aan kala soocin dagaallamayaasha iyo dadka rayidka ah;
- dhinacyada ku lugta leh colaadaha uga baahan yahay in ay daryeelaan kuwa dhaawacmay iyo kuwa buka iyo in ay dhowraan shaqaalaha caafimaadka;
- dhinacyada ku lugta leh colaadaha uga baahan yahay in ay hubiyaan in sharafta maxaabiista dagaalka iyo rayidka laga qaaday xorriyadda la ilaaliyo, gaar ahaan iyaga oo u oggolaanaya booqashooyinka ay sameeyaan ergooyinka ICRC-da

WAA MAXAY DOORKA ICRC?

ICRC waxay u adeegtaa sida ilaaliyaha Xeerka Caalamiga Aadamnimada oo ah aasaaska Axdiyadii afarta ahaa ee Jenefa ee 1949 iyo saddexda Baratakoollada Deeraadka ahaa ee kaabayey.

Heshiisyadaan ayaa ICRC siinaya xuquuqda ay ku fuliyaan hawlaha sida:

- gaarsiinta gargaarka dadka dhaawaca ah, kuwa buka ama shaqaalaha ciidamada oo badda ku haftaa;
- booqashada maxaabiista dagaalka;
- dib-u-soo celinta xiriirkii ka dhexeeyey xubnaha qoysaska oo ay ku kala lumen colaadaha;
- caawinta dadka rayidka ah;
- hubinta in kuwa xeerka bani'aadamnimada dhowraya loola dhaqmo si waafaqsan ballanqaadyada heshiisyada